

Isbedelada lagu sameeyay TANF iyo Shuruudaha U qalmitaanka WorkFirst



Gobolka Washington wuxuu bedelay xeerarka loogu talagalay Caawimaada Kumeelgaarka ah ee la siiyo Qoysaska Saboolka ah (TANF) iyo barnaamijyada WorkFirst.

Laga bilaabo Luulyo 28, 2019, qoysaska ma ahaan doonaan kuwo aanan ugu qalmin si joogto ah caawimaada lacagta caddaanka ah ee TANF midaas oo ay sabab u tahay seddex joojin oo u-hoggaansanaan la'aanta WorkFirst ah. Intaas waxaa sii dheer, qoysaska la kulmaya guri la'aan waxay qaadan karaan caawimaad seddex bilood oo dheeraad ah, ee ka baxsan xadka nolosha ee 60-bilood (dheeraynta xadka wakhtiga).

Dheeraynta xadka wakhtiga, in la ahaado guri la'aan macnaheedu waxay tahay:

- Banaanka in lagu noolyahay,
- In lagu noolyahay dhismo ama meel kale oo aan loogu talogalin in uu banii'aadam ku noolaado,
- In lagu noolyahay dhismo ama meel kale oo aadan u haysanin xaq sharciyeed oo aad ugu noolaatid,
- In lagu noolyahay guri loogu talagalay xaalad deg-deg ah, ama
- In lagu noolyahay guri barnaamij kumeelgaar ah midkaas oo kamid noqon kara barnaamij guri taakulo ama kumeelgaar ah midkaas oo leh mudo xadidan oo la joogo guriga.

Qoysaska aanan u qalmin in ay qaataan caawimaada TANF midaas oo ay sabab u tahay seddex joojin oo u-hoggaansanaan la'aanta WorkFirst ah, ama isticmaalay dhammaan 60-bilood ee caawimaada TANF oona hadda la kulmaya guri la'aan, **ayaa dhici karta in ay hadda u qalmaan caawimaada lacagta caddaanka ah.**

Si aad u codsatid caawimaada lacagta caddaanka ah:

- Ka wac Xarunta Xiriirka ee Adeega Macamiilka lambarkan 1-877-501-2233
- Ka buuxi codsi cusub halkan WashingtonConnection.org
- Booqo Xafiiska Adeegaha Bulshada ee deegaankaaga (CSO)